Qaabab iyo luqado kale
Dukumeentigan waxaad ku heli kartaa luqado kale, far waaweyn, farta Braille-ka ama qaab aad doorbidayso, lacag la'aan. Kala xiriir Explore Health explorehealth@oha.oregon.gov ama 855-268-3767 (cod). Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada gudbinta.

Foomka Wakiilka Idman ee Explore Health

Waxaad xaq u leedahay inaad doorato wakiil idman oo ku caawiya.

Kani waa qof aad ku kalsoon tahay oo aad u oggolaatay inuu Explore Health kala hadlo codsigaaga, arko macluumaadkaaga, kuna metelo arrimaha la xiriira codsigaaga, oo ay ku jiraan helidda macluumaadka adiga kugu saabsan iyo saxeexa dokumentiyada isagoo ku matalaya. Haddii aad rabto inaad yeelato wakiil idman, waxa waajib ah inaad dhammaystirto oo aad gudbiso foomkan. Wakiilkaaga idman wuxuu noqon karaa garyaqaan laakiin arrintaasi khasab ma aha.

Wakiilkaaga idman wuxuu awood u yeelan doonaa inuu:

- Saxeexo codsigaaga iyo foomamka kale sidii oo uu adiga yahay,
- Gudbiyo wixii soo kordha,
- Isagoo ku matalaya ka jawaabo codsiyada cusboonaysiinta ama xaqiijinta,
- Helo nuqulada ogaysiiskaaga iyo wada-xiriirada kale ee ka socda Explore Health, iyo
- Uu adiga kugu matalo dhammaan arrimaha kale ee Explore Health idinka dhexeeya **ilaa aad noo sheegto inaad rabto inaad samayso isbeddel**.

Hadday dhacdo inaad beddesho wakiilkaaga idman, oo ay ku jirto inaad wakiilka iman meesha ka saarto, fadlan la xiriir Xarunta Kaalmada Macmiilka Explore Health 855-268-3767 (wicitaanada gudbinta waa la oggol yahay).

Tallaabada 1-aad: Macluumaadka codsadaha muhiimka ah

Aqoonsiga codsiga: _____

Aqoonsiga qoyska: _____

Magaca (Magaca Hore, kan Dhexe, kan Dambe): _____

Taariikhda Dhalashada (bb/mm/ssss): _____

Iimeylka: _____

Lambarka Taleefanka Guriga: _____

Lambarka Taleefanka Gacanta: _____

Ciwaanka Guriga: _____

Magaalada, Gobolka, iyo baadisooca boostada: _____

Tallaabada 2-aad: Macluumaadka wakiilka idman

Haddaad samaysato wakiil idman, waxaad codsanaysaa in Explore Health ay wixii wada-xiriir ah la samayso wakiilkaaga.

Magaca (Magaca Hore, kan Dhexe, kan Dambe): _____

Taariikhda Dhalashada (bb/mm/ssss): _____

Iimeylka: _____

Lambarka Taleefanka Guriga: _____

Lambarka Taleefanka Gacanta: _____

Ciwaanka Guriga: _____

Magaalada, Gobolka, iyo baadisooca boostada: _____

Tallaabada 3-aad: Heshiisyada iyo saxeexyada

(aan ahayn wakiilada caymiska iyo kaalmeeyayaasha[1])

Wakiil idman waxa dhici karta inuu u qabto shaqooyinka sida kuwa soo socda codsadaha: saxeexidda iyo gudbinta codsiyada iyo cusboonaysiinta, tabinta isbeddelada, iyo helitaanka nuqulada ogaysiisyada iyo wada xiriirada kale.

Wakiil idman waxa dhici karta inuu ku matalo codsadaha barnaamijyada Explore Health, ODHS, ama OHA ee uu codsado ama helo (marka laga reebo barnaamijka Kaalmada Kumeel Gaarka ah ee Ka-Noolayaasha Rabshadda Qoyska iyo xaaladaha qaar adeegyada daryeelka muddada dheer). Tani waxay khusayn doontaa dhammaan codsadayaasha qoyska. Wakiilka idman ee ku qoran foomkan waxa uu beddeli doonaa wixii ah wakiilo idman oo loo oggolaaday qoyska.

Qofka ama ururka loo doortay wakiilka idman wuxuu sii ahaan wakiilka idman ilaa:

[1] Wakiilada caymiska iyo kaalmeeyayaasha waxay horey u fuliyeen Heshiis ka Qaybqaadasho oo ay ku jiraan shuruudahan iyo xaaladahani. Sidaas darteed, saxeexoogu shardi ma aha. Wakiilada caymiska iyo kaalmeeyayaashu waa inay dhammaystiraan Foomka Oggolaanshaha. Lama oggola in looga dhigo wakiilo idman akoonada macaamiisha.

- Codsade qoyska ah ayaa u sheega Explore Health, ODHS, ama OHA inay rabaan inay soo afjaraan ansixintan; ama
- Wakiilka idman ayaa u sheega Explore Health, ODHS, ama OHA inuu rabo inuu soo afjaro ansixintan; ama
- Qofka ama ururka oo aan loo oggolayn inuu sii ahaado wakiilka idman ee codsadaha; ama
- Wakiilka idman waxa beddela wakiil idman oo cusub oo uu soo magacaabay dalbaduhu ama wakiilka idman haddii uu jiro idam sharci ah oo diyaar ah (sida, Awoodda Qareenka, Wakiilnimada).

Haddii wakiilka idman uu siiyo macluumaad qaldan ama aan dhammaystirnayn Explore Health, ODHS, ama OHA oo macluumaadku keeno lacag xadka ka baxsan in la bixiyo, codsadayaasha iyo ciddii ee kale ee masuuliyadda leh ayey tahay inay soo celiyaan lacagta dheeriga ah ee aysan xaqa u lahayn. Haddii wakiilka idman uu si ulakac ah u qariyo macluumaad ama u bixiyey macluumaad qaldan, wakiilka idman ayey sidoo kale tahay inuu lacagta soo celiyo. Wakiilka idman waxa waajib ah inuu joogteeyo qarsoodiga wixii macluumaad ay bixiso Explore Health, ODHS, ama OHA oo la xiriira cid kasta oo ku qoran codsiga ama kiiska iyo inuu sidoo kale si adag u raaco wixii shuruuc gobol iyo fadaraal ee kale ee la xiriira kuwaasi oo khuseeya danaha isdiidan iyo qarsoodiga macluumaadka.

Saxeexista foomkan, cidda hoosta ku saxeexan waxay awood u siinaysaa wakiilkeeda idman inuu iyada u matalo sida sare ku cad mid ahaan**:**

☐ Ilaa laga gaarayo (taariikhda bb/mm/ssss): _____

☐ Ilaa aniga, oo ah dalbadaha muhiimka ah aan muujiyo in wakiilku uusan markaa wixii ka dambeeya i matalaynin.

Saxiixa Codsadaha Muhiimka ah: _____

Taariikhda Saxiixa (bb/mm/ssss): _____

Magaca oo Far Waawayn ah: _____

Saxeexa Wakiilka Idman: _____

Taariikhda Saxiixa (bb/mm/ssss): _____

Magaca oo Far Waawayn ah: _____

Tallaabada 5-aad: Ku gudbi foomkaaga dhammaystiran mid ka mid ah qaababka soo socda

- Haddii aad tahay wakiil idman oo si sharci ah loogu magacaabay cid, fadlan la gudbi caddayn codsigan.

- Fadlan ha dirin nuqulada asalka ah. Ma jiro dokumenti la sii hayo wax ka badan 60 maalmood waana la burburin doonaa kadib marka la geliyo boortalka macmiilka.
- Ku hayso nuqul la dhammaystiray diiwaanadaada.

Onleenka	Boostada	Fakiska
Si degdeg looga hawlgalo, dokumentigan gali akoonkaaga onlaynka ah ee ExploreHealthOR.gov.	Explore Health PO Box 191 Salem, OR 97308	888-705-8691

Explore Health: Oregon's Health Insurance Marketplace
PO Box 191
Salem, OR 97308
855-268-3767 (Wicitaanada gudbinta waa la oggol yahay)ExploreHealthOR.gov